

Isbuuclaha BSD - Oktoobar 5, 2020

Fiidiyowga Nancy Ryles

Quraac iyo buug? Arag sida ardayda K-2 ee Nancy Ryles ay sameeyaan subaxooda.

<https://youtu.be/4rRi1imCPVQ>

Wargelinta Jadwalka Arbacada

Fadlan la soco in Degmadu ay raaci doonto jadowalka ardayda oo ka duwan toddobaadkan. Ardaydu waxay yeelan doonaan maalin waxbarasho oo isku mid ah Arbacada, Oktoobar 7, oo ka soo horjeedda maalinta waxbarasho ee aan jadowalka laheyn ee madaxabannaan. Ma jiraan fasalo jadowal loo qorsheeyay Jimcaha, Oktoobar 9.

Danahaaga qorsheyn awgeed, Arbacooyinka soo socota sidoo kale waxay noqon doonnaan maalmo waxbarasho oo caadi ah oo jadowal leh: Janaayo 20, Febraayo 17 iyo Juun 2.

2021-2022 Khtiyaariyada Waxbarasho ee Bakhtiyaanasiibka Wakhtiga-buuxa ah & Macluumaadka Ogolaanshaha

Ardayda Beaverton ee fasalada 6-12 waxay fursad u leeyihiin inay baaraan khtiyaarada waxbarasho ee sida ugu fiican ku daboolaaayo baahidooda waxbarasho. Ardaydu waxay dooran karaan iskuulka xaafadooda ama waxay ka dalban karaan Barnaamijka khtiyaarada barasho. Gaadiid ayaa la keenayaa.

Fadlan ku samee waxoogaa cilmi-baaris online-ka ah ah oo ku saabsan Barnaamijyada Khtiyaariyada Barashada oo ka qaybgal hal ama in ka badan oo ka mid ah balamada Khadka ee furan.

[Araadjida](#) sanad dugsiyeedka 2021-2022 ayaa la heli doonaa laga bilaabo **Oktoobar 19:**

- Ardayda hadda ee BSD waxay ka codsan karaan online-ka iyagoo adeegsanaya aqoonsigooda ardaynimo.
- Dhammaan codsadeyaashu waa inay ku nool yihiin xuddudaha Degmada Dugsiga Beaverton.
- Ardayda daggan ee aan hadda dhigin dugsiga Beaverton (yacni iskuul-guri ama ardayda iskuulka gaarka loo leeyahay) waxay u baahan doonaan inay dhammaystiraan [paper application](#) eek u jira online-ka, ama xafiiska kasta ee iskuulka **laga bilaabo Oktoobar 19.**
- Codsadayaasha aan haysan internetka waxay ku buuxin karaan dalabka si warqad ah.

- Ardaydu waxay kaliya ku dooran karaan hal ikhtiyaar codsiyadooda.
- Fadlan si gaar ah uga taxaddar xulashadaada dugsiga. Marka arji la gudbiyo, wax isbedel ah lama oggolaan doono.
- Raleigh Hills and Springville waxaa kaliya oo ay aqbali doona codsiyada fasalada 7aad iyo 8aad.

Codsiyada waa in la helaa ugu dambayn Diseembar 11 markay tahay 4:00 pm.

Taariikho muhiim ah, waqtiyada kama dambaysta ah iyo jawaabaha su'aalaha badanaa la isweydiiyo ayaa laga heli karaa [Learning Options webpage](#).

Want to Volunteer at a New School?

Ardaygaagu miyuu u guuray dugsiga cusub sannadkan? Haddii aad jeclaan lahayd inaad khadka ka tabarucdo, waxaad u baahan doontaa inaad cusboonaysiiso koontadaada nidaamkeena maaraynta tabaruca. Fadlan emayl u soo dir

update_volunteer_locations@beaverton.k12.or.us with the following information:

- Magaca iskuulka (lada) lagu **darayo**
- Magaca iskuulka (lada) lagu **bixinayo**

Ama hadaadan rabin inaad tabarucid, emayl usoo dir si magacaada nidaamka looga saaro.

Sanduuqyo Cunto oo Bilaash ah

Howshii waa noo bilaabatay! Wey mahadsantahay deeq ka timid USDA, hadda waxaan awoodnaa inaan ka bixino sanduuqyo cunto oo bilaash ah seddex goobood ee BSD **Arbacada** toddobaad kasta:

Aloha High School: 11 a.m. - 1 p.m. (ama ilaa sanduuqyada la wada qeybiyo)

Beaverton High School: 12 p.m. - 1 p.m.

Southridge High School: 12 p.m. - 1 p.m.

Waxaan rajeyneynaa in midkiiba noqoto 44-lb. sanduuqa waxaa ku jiri doona qudaar/miro, caano iyo hilib. Ma jiraan wax shuruudo ah oo lagu qaadato sanduuq. Qaybintu way u furan tahay dhammaan.

Meelo kale oo cunooyin bilaash ah waxaa laga heli karaa kale [Community Resources webpage](#).

Ma xiisaynaya tabaruca Guddiga Miisaaniyadda ee BSD

Dugsiga Degmada Beaverton waxaa ka bannaan laba boos oo ka mid ah Guddiga Miisaaniyadda waxayna raadineysaa gudi dad kala duwan ah. Jagooyinkaani waxay ku

jiraan Guddiga Iskuulka [Zone 1](#) and [Zone 2](#). Guddiga Miisaaniyadda waxay ku qabtaan howlaha shirarka dadweynaha ee fiidkii ee la qabto inta u dhexeysa Nofeembar iyo Juun. Guddigu wuxuu dib-u-eegis ku sameeyaa miisaaniyadda Degmada waxayna soo jeedinayaan isbeddelada loo baahan yahay. Kadib waxay ansaxineysaa miisaaniyada una gudbineysaa Gudiga Iskuulka si ay u meel mariyaan dhamaadka Juun.

Booqo [Budget Committee Application webpage](#) macluamad dheeri ah ama sida loo codsado.

Ilaha Barashada ee WCCLS

Raadinta ilo ka caawiya ardaygaaga barashada fog? Washington County Cooperative Library Services (WCCLS) ayaa caawin karto.

Dhammaan ardayda BSD waxay leeyihiin Youth Access Card oo u oggolaanaysa inay si bilaash ah ku helaan dhammaan adeegyada. (Ardayda cusub iyo xanaanooyinka waxay heli doonaan kaarkooda dayrta). Kaararka Isticmaalka Dhallinyarada ayaa u oggolaanaya ardayda inay qaataan markiiba shan buug ama buugaag maqal ah, oo ay weheliso helida adeegyadan:

<https://www.beavertonlibrary.org/479/Youth-Access-Card>

- **Maktabadda Waxyaabaha:** Maktabadda Magaalada Beaverton iyo Maktabadaha Bulshada ee Cedar Mill waxay leeyihiin Maktabad uruurisa Waxyaabaha leh STEM si kor loogu qaado barashada, oo ay ku jiraan ciyaaraha xisaabta, robotikada, xirmooyinka koodhka iyo Legos.
- **Xirmooyinka buugaagta:** Ka qaado Xirmooyin Buug ah Maktabadda Magaalada Beaverton iyo Maktabadaha Bulshada ee Cedar Mill, oo loogu talagalay heerar kala duwan oo akhris iyo wax aad xiiseyso.
- **Xaflado khadka ah:** Iska-diiwaangeli xaflada khadka ah, oo ay kujirto sheekooyinka toddobaadlaha ah.
- **eBooks and eAudiobooks:** Isticmaalaya Sora, ardaydu waxay ka dooran karaan keydka cinwaanada ee WCCLS.
- **Kaalmada Shaqoguriga:** Caawinta shaqada guriga ee tooska ah ayaa la heli karaa maalin kasta laga bilaabo 1-10 pm. oo ah Ingiriis iyo Isbaanish iyada la adeegsanyo Brainfuse HelpNow. Brainfuse sidoo kale waxay bixisaa diyaarinta imtixaanka iyo qorista / caawinta cilmi baarista.
- **Tumblebooks:** Fiiri oo dhagayso buugaagta sawirada leh (animated).
- **Luqadaha Mango:** Baro mid ka mid ah 70 luqadood ee Mango.
- **Sheybaar kombiyuuterka :** Maktabadda Magaalada Beaverton waxay leedahay shaybaar kombiyuutar. Wac ama ka hubi bogga saacadaha shaqada.

Socodka Caalamiga ah + Usoco Meelkasta Maalinta 2020

Kusoo biira ardayda Beaverton, qoysaska iyo shaqaalaha International Walk + Roll to Anywhere Day ee Oktoobar 7. Ardayda iyo qoysaska adduunka oo dhan waxay kaga qeyb geli doonaan xaafadhooda. Ardaydu way ku guuleysan karaan abaalmarinno ammaan ah oo xiiso leh sida jijimooyin iftiimaya iyo xargaha kabaha, laydhadhka biligbilig leh ee amniga iyo koofiyadaha baaskiilka Iskuulada ugu badan ee kaqeyb gala waxaa gelin doonnaa inay ku guuleystaan xirmo buug oo Safe-Routes-to-School ah ee maktabadaha dugsiyadooda.

Si aad ugu guuleysato abaalmarinta, buuxi kan [Google form](#) qof kasta oo ku soo biiray safarkaaga. Ardayda BSD waa inay ku daraan magacyadooda iyo lambarrada Aqoonsiga si loo geliyo abaalmarinta. La wadaag sawirkaaga oo ay ku qoran tahay calaamad noo sheegaysa sababta aad u jeceshahay inaad u sameyso socod, baaskiil, mooto ama skate dhanka Facebook (@BeavertonSafeRoutes) ama Instagram (@beavertonsaferoutes) oo la socoto hashtag #BSDtogether.